San Diego City Schools

Fact Sheet

Xilliga Dayrta 2003

Kulliyada Waalidka ee San Diego

Cilmi-baadhis badan oo la sameeyey waxay muujisey in marka ay waalidiintu si firfircoon uga qeyb qaataan hawlaha waxbarashadda ee ilmahooda ku taxaluqa inay saameyn wanaagsan ku leedahay guusha waxbarashadda ee ilmaha. Bishii Oktoobar 2000 ayaa la aasaasay *Kulliyada Waalidka ee San Diego.* Waxaa kulliyadaas loogu talagalay inay waalidiinta ka caawiso sidii ay u kordhi lahaayeen inay ka hawlgalaan waxbarashadda ilmahooda, iyagoo noqoneya tababareyaal waxbarasho, una adkeeyaan xirfadaha waalidnimo, isla mar ahaantaasna, u hagaajiyaan xidhiidhka waalidka iyo ilmaha ka dhexeeya. *Kulliyada Waalidka* waxaa heli kara waalidiinta ay ilmahoodu dhigtaan dugsiyada ku jira barnaamijka Title I loo yeqaano, waxay kaloo kulliyadu bar-tilmaameed ka dhigata dugsiyada lagu magacaabey inay waxbarashadda ardeydu hooseyso.

Fasalada waxaa lagu bixiyaa Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard, oo ku taal 2375 Congress Street in Old Town (oo horey u ahaan jirtey Dugsiga Hoose ee Fremont). Fasalada waxbarashadda waxaa waalidiinta loogu dhigaa u diyaargarowga xirfadaha dugsiga, xirfadaha waxbarashadda, iyo luuqada, wax akhriska iyo wax qorista iyo xisaabta si ay ardeyda uga kaalmeeyaan inta ay ku jiraan fasalka xanaanada ilaa iyo dugsiga sare. Fasalada waalidnimada wacan, waxaa waalidiinta lagu baraa sida ay ilmahooda uga caawin lahaayeen xag bulsheed, xag shucuureed iyo xag koritaanka jidhkaba, taas oo ahmiyada la saareyo in xidhiidhka waalidka iyo ilmuhu wanaagsanaado. Waxaa kaloo waalidiinta la baraa habka wax hoggaaminta si ay jaalnimo ula shaqeeyaan shaqaalaha dugsiga.

Maalmaha Isniinta ilaa iyo Khamiista ayaa fasalada maalinimada la bixiyaa. Barnaamijkan waxaa loogu talagalay waalidiinta ay ilmahoodu dhigtaan fasalada dugsiga-ka hor, xanaanada iyo fasalka koowaad. Waxaana loo sii ballaadhin doonaa oo lagu soo darayaa waalidiinta ardeyda dhigata fasalka labaad ilaa iyo fasalka shanaad. Fasalada fiidkii waxaa la dhigtaa maalinta Talaadada ah saacadaha 7:00 ilaa iyo 8:30 fiidnimo.

OO KOOBAN

- **Laga bilaabo bishii Oktoobar 2002 ilaa iyo Luuliyo 2003: Waalidiin dhan 1,584 ayaa ka qeybgalay 5,856 xiisadaha fasalka ah**
- **Laga bilaabo bisha Sebtember ilaa iyo Luuliyo waxaa fasalada waxbarashadda iyo waalidnimada wacan waxaa la siiyaa waalidiinta carruurta ku jirta fasalda Xanaanada ilaa iyo 12aad: Habeenimada Talaadada ah : 7:00 – 8:30 fiidnimo.**
- **Maalinimada: Isniinta ilaa iyo Khamiista: jadwalka fasalka iyo manhaj kala duwan**
- **Gaadiid lacag la'aan ah**
- **Barnaamijyo lagu dhiirigelineyo ka soo qeybgalka wanaagsan**
- **Caruurta da'doodu u dhexeyso kuwa markaas dhashay ilaa iyo 16 jirka**
- **Jaalalka bulshadu waxay lacag siiyaan si ay ugu dhiirigeliyaan in barnaamijyada la iska diiwaangeliyo**

Dhammaan koorsooyinka waxaa dhigeya macallimiin shahaado macallinimo oo la aqoonsanyahay haysta, la-taliyeyaal, iyo xubno waayo-aragnimo leh oo jaaliyada ka mid ah, waxaana duruusta lagu bixiyaa luuqadaha Ingiriisiga iyo Isbaanishka. Fasalo xadidan ayaa lagu dhigaa luuqadaha Koonfur-bari ee Eashiya: Kaamboodhiyaan, Moong, Laa'oo, iyo Fiyetnaamiis. Gaadiid lacag la'aan ah ayaa la siiyaa dugsiyo laga soo xuley degmada.

Inta ay waalidiintu fasalada ku jiraan, ayaa Barnaamijka Kobcinta Waxbarashadda Carruurta waxaa uu carruurta u dhigaa waxyaabo kala duwan oo ay ka mid tahay farshaxanka luuqada iyo waxyaabo la xidhiidha xisaabta iyo iyagoo shaqada-guriga ee dugsiga laga soo siiyey oo laga caawiyo. Carruurta af Ingiriisiga Baraneysa waxaa la siiyaa laba saacadood oo dheeraad ah si looga kaalmeeyo barashadda af Ingiriisiga, waxaana loo dhigaa maalin kasta oo ay ka soo qeybgalaanba. Carruurta ku jirta fasalada dugsiga-ka hor waxay ka qeybgalaan barnaamij xanaanada carruurta ah oo habbeysan, kaas oo gaar ahaan da'daas loogu talagalay, inta ay waalidkood fasalada ku jiraan. Barnaamijka waxaa la siiyaa carruurta ay da'doodu u dhexeyso kuwa markaas dhashay ilaa iyo 16 jirka.

Jaalalka bulshadu waxay lacag siiyaan qorshaha lagu dhiirigelineyo inay waalidiintu ka soo qeybgalaan. Waxyaabaha dhiirigelineya in wax la qabto waxaa ka mid ah in buugta carruurta la siiyo si loo ballaadhiyo maktabada guriga iyo shahaadooyin abaalmarin ah oo la siiyo qofkii si wanaagsan u dhammeya 10 koorso oo barnaamijyada habeenkii la dhigo ah. Waalidiinta ka qeybgala ugu yaraan 10 koorso oo ah kuwa habeenkii la dhigo ah waxaa dhammaadka sannadka la siineyaa tigidh bakhtiyaa-nasiib ah oo lagu helayo koombiyuutarka guryaha la dhigto oo lacag la'aan ah.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay ururka Annie E. Casey Foundation

Somali Version: San Diego Parent University

Warbixinta kala xidhiidh: Xarunta Waalidiinta ee Harold J. Ballard: (619) 293-4431
Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578 www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma(oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsaneysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.

"Ujeeddada San Diego City Schools waxaa weeyaan inay ardeydu guul ka gaadhaan waxbarashadda, waxaana laga taageeri doonaa xaga wax dhigista iyo waxbarashadda fasalka dhexdiisa ah."